IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA *DI*MOQARAAD*I*GA SOOMAALIYA

الجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 7aad — Muqdisho 15 Luulyo 1979 — 1 R 7

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

FAAFINTA BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sannadii waa Sh. 100 Somaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Jenayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa la weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 28 ee 23 Juunyo 79, Heshiiska Amaah-da ee dhexmaray JDS iyo Bangiga Horumarinta Islaamka. — Bogga 493

LAW N. 28 Jun 1979, The Laon Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the Islamic Development Bank. — » 494

SHARCI L. 29 ee 23 Juunyo 79, Heshiiska Amaah da ee dhexmaray J.D.S. iyo Bangiga Horumarinto Afrika. — » 495

LAW N. 29 on 23 Jun 1979, The Loan Agreement between the Government of Somali Democratic Republic, and the African Development Fund. — » 496

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 36 ee 7 Abr. 79, Guddoonsiin Billado Maar ah ee Hawl/mo. » 497

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L.37 ee 12 Ab. 79, Magacaabid Rasmi ah » 498

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L.38 ee 14 Ab. 79, Wax ka Beddelaad Qaabka Dhismaha D/Hoose ee Muqdisho. » 499

XEER MADAXWEYAHA JDS, L. 39 ee 15 Ab. 79, Magacaabid Agaasimayaal. » 502

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L.40 ee 30 Juun. 79, Dhismaha iyo Magacaabidda Xubnaha Guddiga Abaalmarinta toban Guurada Kacaanka 21ka Oktoober 1969. » 503

XEER MADAXWEYNAHA, JDS L. 41 ee 14 7 79 Magdhow la siinayo dad Beero lagala wareegay dan Guud Awgeed. » 505

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA H. GUUD 7. Feb. 79, Bed. Naado Dhul J/le Faaduma Cali Maxamed L.452 » 507

WASAARADDA H. GUUD 7. Feb. 79, Bed. Naado Dhul J/le Xuseen Cali Maxamed L. 453

WASAARADDA H. GUUD 7. Feb. 79, Bed. Naado Dhul J/le Xaliima Canab Sheekh L.454 » 508

WASAARADDA H. GUUD 7. Feb. 79, Bed. Naado Dhul J/le Maxamuud Clise Samantar. L. 455

WASAARADDA H. GUUD 7. Feb. 79, Bed. Naado Dhul J/le Maxamed Muxyidiin L. 456 » 509

WASAARADDA H. GUUD 7. Feb. 79, Bed. Naado Dhul Jaalle Cali Maxamed Afrax L. 457

WASAARADDA H. GUUD 7 Feb. 79, Naado Dhul Jaalle Xaashi Xabiib L. 458 » 510

WASAARADDA H. GUUD 7 Feb. 79, Naado Dhul Jaalle Xaajiya Asli Barre L. 459

WASAARADDA H. GUUD 7 Feb. 79, Naado Dhul Jaalle Xaaji Maxamuud Hilowle, Seynab Maxamed Xaaji L. 460 » 511

WASAARADDA H. GUUD 7 Feb. 79, Naado Dhul Jaalle Maxamed Xaaji Jaamac L. 461

WASAARADDA H. GUUD 7 Feb. 79, Naado Dhul Jaalle Khamar Maxamed Xaaji L. 462 » 512

WASAARADDA H. GUUD 7 Feb. 79, Naado Dhul Jaalle Abiib Xaaji Jaamac L. 463

WASAARADDA H. GUUD 7 Feb. 79, Naado Dhul Jaalle Muxudiin Maxamed Maxamuud L. 464 » 513

MAXKAMADDA GOBALKA BANAADIR, 10.7 79, Lumid Buug Keyd L. 466 ku qoran ShS. 45.080 u lahayad Maxameed Cabdi Barree L.465 » 514

MAXKAMADDA GOBOLK BANAADIR, 17.7.79, Lumid Buug K. Lam. 11615 ku qoran ShS. 6000 u leeyahay Saciida Maxamed L. 466 » 515

» 516

SHARCI L. 28 ee 23 Juunyo 79, Heshiiska Amaahda ee dhexmaraay J.D.S. iyo Bangiga Horumarinta Islaamka.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969.

ISAGOO ARKAY: Heshiisyada tirsigoodu yahay 1,17,18 iyo 19 ee 1dii Luulyo, 1976.

ISAGOO ARKAY: Heshiiska Amaadda ee dhexmaraay JDS iyo Bangiga Horumarinta Islaamka kuna saabnan Manhruuca Bulaacadha Xamar, laugna kala saxiixday Jedda, 13kii Jan. 1979.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiiradda ee 7.6.1979

WUXUU SOO SAARAYAA SHARCIGA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Heeshiiska Amaahda ee dhexmaraay JDS iyo Bangiga Horumarinta Islaamka kuna saabsan Mashruuca Bulaacadahra Xamar, laguna kala saxiixday Jedda, 31kii Jannaayo 1979 waa la

Qodobka 2aad

Heshiisku wuxuu ku yeelan doonaa JDS astaan sharci ah; waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya.

Muqdisho 23.6.1979

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
Madaxweynaha J.D.S.

LAW N. 28 on 23st Jun 79, The Loan Agreemeent between the Government of the Somali Democratic Republic and Islamic Development Bank

PRESIDENT OF THE
SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

HAVING SEEN: The 1st, 2nd, and 3rd, Charter of October 21st Revolution 1969.

HAVING SEEN: Law no. 1, 17,18 and 19 of ist July 1976

HAVING SEEN: The Loan Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the Islamic Development Bank for Swerage and Storm Water Drainage project, signed at Jedda on 31st. Junary 1979.

TAKING NOTE: Of the approval of the Political Bureau and that of Council Ministers dated 7.6.1979
Hereby promulgates the followig law:-

Article I

The Loan Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the Islamic Development Bank for Mogadishu Sewerage and Storm Water Darinage Project, signed at Jedda on 31st. January 1979, is hereby ratified.

Article II

This Agreement shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic; and shall be published in the Official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

Mogadishu 23 6 1979

MAJOR GENERAL MOHAMED SIAD BARRE
PRESIDENT OF THE
SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

SHARCI L. 29 ee 23 Juunyo 79, Heshiiska Amaahda ee dhexmaray J.D.S. iyo Bangiga Horumarinta Afrika.

ray J.D.S. iyo Bangiga Horumarinta Afrika

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MEELMARIN HESHIIS

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar, 1969.

ISAGOO ARKAY: Shrarciyadda tirsigoodu yahay 1,17,18 iyo 19 ee 1dii Luulyo, 1976.

ISAGOO ARKAY: Heshiiska Amaahda ee dhexmaray JDS iyo Bangiga Horumarinta Afrika kuna saabsan Mashruuca Bulaacadaha Xamar, laguna kala saxiixday Abidijan, Ivory Coast, 30kii Agoosto 1978

ISAGOO TIXGELINAAYA: Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Gclaha Wasiiradda ee 7.6.1979

WUXUU SOO SAARAYAA SHARCIGA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Heshiiska Amaahda ee dhexmary JDS iyo Bangiga Horumrint Afrika kuna saabsan Mashruuca Bulaacadaha Xamar, lguna kala saxiixday Abidijan, Ivory Coast, 30th August 1978, mariyey.

Qodobka 2aad

Heshiisku wuxuu ku yeelan doona JDS astaan sharci ah; waxaana lagu soo saari doonaa Faafint Rasmiga ah ee JDS.

Muqdisho 23.6.1979

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
Madaxweynaha J.D.S.

LAW N. 29 on 23th Jun 79, The Loan Agreement between the Government of Somali Democratic Republic and the African Development Fund.

PRESIDENT OF THE
SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

INSTRUMENT OF RATIFICATION

HAVING SEEN: The 1st, 2nd, and 3rd, Charter of October 21st Revolution 1969.

HAVING SEEN: Law No. 1,17,18 and 19 of 1st July 1976.

HAVING SEEN: The Loan Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the African Development Fund for Mogadishu Sewerage and Storm Water Drainage Project, signed at Abidijan, Ivory Coast, on 30th August, 1978.

TAKING NOTE: Of the approval of the Political Bureau and that of Council Ministers dated 7.6.1979
Hereby promulgates the followig law:-

Article I

The Loan Agreement between of the Somali Democratic.
The Loan Agreement between of the Somali Democratic Republic and the African Devolopment Fund for Mogadishu Sewerage and Storm Water Drainage Project, signed at Abidijan, Ivory Coast, on 30th August, 1978, is hereby ratified.

Article II

This Agreement shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic; and shall be published in the Official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

Mogadishu 23 6 1979

MAJOR GENERAL MOHAMED SIAD BARRE
PRESIDENT OF THE
SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 36 ee 7 Abriil 79, Guddoonsiin Billado Maar ah oo Hawlkarnimo.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969, iyo Sharciga lam. 1 1dii Luulyo 76;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lamb. 65 ee 19kii 1970;

MARKUU TIXGELIYEY: Kaalintii aqoonsiga mudnayd ee Takhaatiirta Soomaaliyeed ay ka qaateen halgankii taariikhiga ahaa ee Gobannimadoonka Soomaali Galbeed iyo Ogow 1977/78, iyagoo gudanaya waajibaadka ka saarnaa badbaadinta, daaweynta iyo xannaaneynta naftood hurayaashii ku dhaawacmay halgankaas;

MARKUU ARKAY: Inay lagama maarmaan tahay in Jaallayaashaas la guddoonsiiyo aqoonsiga iyo qaddarinta ay Kacaankocda iyo Ummaddoodaba ka mudan yihiin, loogana reebo raad dhaxal gal ah, taariikhi ah;

MARKUU TIXGELIYEY: Go,aankii Guddiga Gurmadka Caamadka ee Gobolka W.Galbeed;

MARKUU DHAGEYSTAY: Talada Guddiga Gurmadka iyo Dallacaadda ee M.J.D.S.

WUXUU GUDDOOMIYEY
Qodob Keliya

Waxaa lagu maamuusay Jaallayaasha soo socda oo ka tirsan Takhaatiirta Soomaaliyeed, Billad Maar ah oo Hawlkarnimo:

1. Tr. Maxamed Cabdullaahi Maxamed
2. Tr. Maxamed Muuse Sugulle
3. Tr. Maxamed Cali Xasan
4. Tr. Maxamed Xasan Dirir
5. Tr. Axmed Cige Xasan
6. Tr. Xasan Barre Maxamed
7. Tr. Axmed Cabdi Xasan
8. Tr. Yaasiin Xaaji Xirsi
9. Tr. Mustafa Xaaji Nuur
10. Tr. Saalax Caydaruus
11. Tr. Maxamed Cali Munasar

Mudisho 7 Abriil 1979

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
Madaxweynaha J.D.S.

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 37 ee 12 Abriil 79 Magacaabid Rasmi ah:

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tii 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969

ISAGOO ARKAY: Xeerka lam. yahay 28 Biis ee 21 2 76, iyo wax ka badalidii ka dambeeysay, kaas oo lagu dhaqo snqaalana D/Hoose ee Muqdisho.

ISAGOO OGAADAY: In Jaallayaasha hoos ku qoran muddo dheer ay ku meel gaarnimo ku nayeen jagooyin muhiim ah,

ISAGOO HUBSAADY: In Jaallayaashani yihiin kuwa astaaniia in rasmi ahaan loogu wareejiyo xilkii ay hore u hayeen kadib markii ay muujiyeen xil kasnimo dheeri ah.

ISAGOO DHAGEYSTAY: Talo jeedinta Duqa Magaalada Muqdisho.

MUXUU SOO SAARAY XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Ka dib markii Jaallayaasha hoos ku qorani ay muujiyeen karti iyo xil kasnimo dheeraad ah, waxaa rasmi ahaan loogu magacaabay xilkii ay ku meel gaarnimada ugu heyn jireen D/Hoosee ee Muqdisho, kuwaas oo kala ah.

1) J/le Xasan Xaaji Maxamuud KU/HA Duqa Magaalaqa ee Maamulka Guud.
2) J/lee Cabdullaahi Salaad Warsame KU/HA Duqa Magaalada ee Maaliyadda iyo Warshadaha.
3) J/le Cali Rooble Maxamed Agaasimaha Waaxda Suuqyada.

Qodobka 2aad

Jaallayaasha xilkan lagu magacaabay waxey ku mushahar qaadan doonaan Darajooyinkii ay hore u lahaayeen isla markaasina xaq u yeelan doonaan Gunnada sharci ahaan ugu dhigan mid walba jaga magacaabay.

Qodobka 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan geli doonaa markii uu soo saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

Muqdisho 12 Abriil 1979

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
Madaxweynaha J.D.S.

(Jaalle Yuusuf Ibraahim Cali «Abuuraas»)
(Xubin Golaha Dhexe)
(ahna Duqa Magaalada Muqdisho)

Waan Aragnay ee Diiwaan Gelinnay
Diiwaanka Lamb. 3 bogga lamb. 61
Muqdisho 27 Abriil 1979
Ku Xigeenka Hanti dhowraha Guud

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 38 ee 14 Abriile 79 Wax ka Beddelaad Qaabka Dhismaha D/Hoose ee Muqdisho.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969.

ISAGOO ARKAY: Xeerka lam. yahay 28 biis ee 21.2.76, kaasoo lagu dhaqo Shaqaalaha D/Hoose ee Muqdisho.

ISAGOO ARKAY: Xeerarka lamb. yahay 86 ee 23.8.77 iyo kan lam. yahay 50 ee 14.1.78, kuwaasoo wax looga toosiyey Xeerka Shaqaalaha lamb. yahay 28 biis ee 21.2.76.

ISAGOO ARKAY: Xeer Nidaamiyaha Guddiga Maamulka D/Hoose ee Muqdisho ee lamb. yahay 83 ee 18.10.78.

ISAGOO HUBSADAY: In la loo baahan yahay in wax laga beddeelo Qaabka Dhismaha Maamulka D/Hoose ee Muqdisho.

ISAGOO OGAADAY: Baahida loo qabo Abuuridda Jagooyin cusub iyo toosin jagooyinkii hore.

ISAGOO DHAGEYSTY: Talo jeedinta Duqa Magaalada Muqdisho.

WUXUU SOO SAARAY XEERKA SOO SODA

Qodobka 1aad

TOOSIN

Waxaa lagama maarmaan noqotay in wax laga beddelo ama laga toosiyo jagooyinkii hore ugu jiray Xeerka Shaqaalaha D/Hoose ee Muqdisho, waxaana loo toosiyey sida soo socota:

B. QAYBTA FARSAMADA

Jagadii aheyd Qeybta Farsamada waxaa Magaceeda loo toosiyey hadda wixii ka dambeeyana loo oqoonsan doonaa «QAYBTA HAWLAHA GUUD EE D/HOOSE EE MUQDISAO»

T. QAYBTA ARRIMAHA IJTIMAACIGA.

Jagadii aheyd Qaybta Arrimaha Ijtimaaciga waxaa Magaceeda loo toosiyey, hadda wixii ka dambeeyana loo aqoonsan doonaa «QAYBTA ARRIMAHA BULSHADA D/HOOSE EE MUQDISHO».

J. QAYBTA MAAMULKA GUUD

Jagadiiaheeyd Qaybta Maamulka Guud, waxaa loo toosiyev hadda wixii k dambeeyana loo aqoonsan doonaa «QAYBTA APRIMAHA SHAQAALAHA»

X XOOHHAYAHA ARRIMAHA MAAMULKA GUUD

jagadii aheyd Xooghayaha Arrimaha Maamulka Guud waxaa loo toosiyey, hadda wixii ka dambeeyana loo aqoonsan doonaa. «XOOGHAYAHA GUDDIGA MAAMULKA D/HOOSE EE MUQDISHO» waxeyna hoos imaan doontaa Xooghaynta Guud ee Maamulka D/Hoose, gaar ahaanna qaabilsanaan doonaa Haqeynta Fulinta iyo qaban qaabinta Ajendooyinka Maamulka D/Hoose ee Muqdisho.

KH. XOOGHEYNTA MAAMULKA GUUD

Jagadii aheyd Xogheeynta Maamulka Guud, waxaa loo toosiyey, hadda wixii ka dambeeyana loo aqoonsan doonaa «XOGHEYNTA GUU EE MAAMULKA D/HOOSE.

D. WAAXDA ARRIMAHA IJTIMAACIGA

Jagadii ahreeyd Waaxda Arrimaha Ijtimaacioa, waxaa loo toosiyey, hadda wixii ka dambeeyana loo aqoonsan doonaa «WAAXDA HAWLAHA BULSHADA»

Qodobka 2aad

ABUURID JAGO CUSUB

Waxaa lagama maarmaan noqotay in Maamulka D/Hoose ee Muqdisho uu qaabkii Dhismaha Shaqaalaha ku kordhiyo Jagooyin cusub, taasoo ay keentay Baahsanaan iyo Mugga Hawlaha kala duwnan ee D/Hoosee ku daryeeleyso Bulsho weynta ku nool G/Banaadir, jgada cusub ee la abuurayana waa tan soo socota:

QAYBTA HAWLAHA GUUD

JAGO. Lam. 41213. waxaa loo Abuuray laan cusub oo jago ahaan lagu Magacaabi doono «LAANTA QORAALADA IYO Arrimaha Dacwooyinka wxeyna hoos imaan doontaa KU/ Si-

doontaa KU/HA DUQA QAYBTA HAWLAHA GUUD «A6».

Jago. Lam. 00036.

Waxaa loo abuuray jago cusub oo lagu magbcaabi doono «FARACA QARSOODIGA» «B2»

Qodobka 3aad

Qodobada Xeerkani ka kooban yahay waxaa lagu kordhin doonaa Xeerarka horee ee lam. yahay 28 biis ee 21.2.76, kaasoo lagu Maamulo Shaqaalaha D/Hoose ee Muqdisho.

Muqdisho 14 Abriil 1979

Madaxweynaha J.D.S.

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan Aragnay ee Diiwaan Gelinnay
Diiwaanka Lamb. 1 Bogga lamb. 103
Muqdisho 27 Maajo 1979
Ku Xigeenka Hanti dhowraha Guud
Sax. Xuseen Cabdulle Cali

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 39 ee 15 Abriil 1979 Magacaabid Agaasimeyaal

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo [illegible]an 3aad ee Kacaankii 21ka Oktoobar 1969.

ISAGOO ARKAY: Xeerka lam. 28 biis ee 21.2.76 iyo Beedlelaadii ka dambeeysay ee lagu dhaqo Shaqaalaha D/Hoose ee Muqdisho.

ISAGOO ARKAY: Xeer Nidaamiyaha Guddiga Maamulka D/Hoose ee lamb. yahray 83 ee 18.10.78,

ISAGOO U ARKAY: lagama maarmaan in mid walba lagu Magacaabo Jagada hortiisa ku qoran. maadaama si ku meel gaarnimo ah ay xil Agaasime ugu hayeen D/Hoosee ee Muqdisho. isla markaasina karti dheeri ah ay ka muujiyeen waajibaadkooda Qarannimo.

ISAGOO TIXGELINAYA: Talo jeedinta Duqa Magaalada Muqdisho.

WUXUU SOO SAARAY XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Laga bilaabo markii Xeerkan Madaxweynaha J.D.S. soo saxiixo waxa Jaallayaasha hoos ku qoran lagu magacaabay jagada mid walba magaciisa ku hor qoran:

1. J/le Maxamed Yuusuf Axmed Agaasimaha Warshadda Habka Cusub.

2. J/le Cali Maxamed Maxamuud «Xareed» Agaasimaha Waaxda Dad-dhigidda.

Qodobka 2aad

Jaallayaasha la Magacaabay, waxey ku mushahar qaadan doonaan Darajooyinkoodii hroree. hase yeeshee waxey xilkan ku mutevsan doonaan Gunnada Xilka iyo Guriga ee sharci ahaan ugu dhigan jagada Agaasimeyaasha.

Qodobka 3aad

Xeerkaan wuxuu dhraqan gelayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

Muqdisho 15 Abriil 1979

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
Madaxweynaha J.D.S.

(Jaalle Yuusuf Ibraahim Cali «Abuuraas»)
(Xubin Golaha Dhexe)
Ahna Duqa Magaalada Muqdisho)

Waan Aragnay ee Diiwaan Gelinnay
Diiwaanka lamb. 1 bogga lam. 62
Muqdisho 27 Maajo 1979

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 40 ee 30 Juunyo 79 Dhismaha iyo Magacaabidda Xubnaha Guddiga Abaalmarinta Toban guurada Kacaanka Oktoobar 1969.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Warqadda 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Ka-Caanka 21ka Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY: Shrarciga lamb. 65 ee 19ka Oktoobar 1970

MARKUU ARKAY: Wareegtada Xooghayaha Guud ee X.H.K.S. lamb. XHKS/XXG/E4/441/79, taariikh 20 Maajo 1979, kuna saabsan dabaaldagga toban guurada Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY: Inay lagama maarmaan tahay in loo magacaabo Guddi gaar ah oo ballaaran abaalmarinta Toban ban guurada Kacaanka 21ka Oktoobar 1969, si loo heelo qiimeyn dhan kasataba ka dhammeystiran;

MARKUU ARKAY: Xeerka Madaxweynaha JDS lam. 60 ee 16.6.78 oo lagu magacaabay Guddiga Dallacaada iyo Abaalmarinta ee MJDS;

WUXUU SOO SAARAY

XEERKA SOO SOCDA:

Qodobka 1aad

Waxaa la dhisay Guddiga Abaalmarinta Toban guurada Kacaanka 21ka Oktoobar 1969.

Qodobka 2aad

Guddiga Xilkiisu wuxuu yahay:

1) In uu qiimeeyo Abaalmarinta ay mudan yihiin Wasaaradaha, Wakaaladaha, Warshadaha, Shariikadaha iyo Mashruucyada Dawladda, Ciidamada Qalabka Sida, Gobollada iyo Degmooyinka isagoo qiimeeyntiisa ku saleysan:

i) horumarka hay'aduhu gaareen xag dhaqaale iyo bulshaba;

ii) heerka abaabulka ee hayadahaas;

iii) qeybta ay ka qaateen ololayaashii ka hirgalay Dalka Jamhuuriydda Dimocaraadiga Soomaaliya (OHRM, Raridda iyo Deejinta dadkii abaaruhu tabaaleeyeen, Bacaadcelinta,

iv) abaalmarnta hayaddu muteeysatay 10kii sano ee Kacaanku Dalka maamulayey.

2) In uu qiimeeyo dadkii soo halgamay muddada iyada ah, talona ka soo jeediyo abaalmarinta ay mudan yihiin.

Qodobka 3aad

Guddigu wuxuu ku hawl galayaa habka ku xusan sharciga lmb. 65 ee 19ka Oktoobar 1970 (Sharciga Abaalmarinta).

Qodobka 4aad

Guddigu wuxuu ka kooban yahay xubnaha soo socda:

— S/Guuto Maxamuud Geelle Yuusuf — Guddoomiye
— Gaashaanle Sare Cabdi Warsame Isaaq ku-qeybsanaha Arrimaha Shaqaalaha, Bulshada iyo Kormeerka MJDS, — Xubin
— Gaashaanle Sare Cabdulqaadir Xaaji Maxamed Guddoomiyahra Hogggnka Abaabulka Golaha Dhexe XHKS — Xubin
— Jaalle Maxamed Buraale Ismaaciil Wasiirka Shaqada iyo Arrimaha Bulshada — Xubin
— Jaalle Maxamuud Cali Axmed Guddoomiyahra Xiriirka Guud ee Ururada Shaqaalaha Soomaaliyeed — Xubin
— Jaalle Maxamed Maxamuud Warsame Guddoomiyaha Ururka Dhallinyarda Ka-
— Jaalle Faadumo Cumar Xaashi Guddoomiyaha Ururka Dimoqaraadiga Haweenka Soomaaliyeed — Xubin
— Jaalle Axmed Cali Saalax — Xooghaye

Qodobka 5aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo 20ka Maajo 1979.

Muqdisho 30 Juunyo 1979

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
Madaxweynaha J.D.S.

XEER MADAXWEYNAHA JDS lam. 41 ee 21 Juunyo 1979 Magdhaw la siiyey dad Beero lagala wareegay dan guud awgeed

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. 12 ee 18 maajo 1955 iyo lam. 73 ee 21 Oktoobar 1975, kuna saabsan dhulka dhismaha iyo kuwa la siman Beeraha oo dan guud awgeed loola wareegi karo;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. yahay 41 soona baxay 13 Sett. 1973;

ISAGOO ARKAY: Warqadda lam. GM/GB/1168/78 ee uu soo saxiixay Guddoomiyaha Guddig maamulka Gobolka Bay ee dan guud awgeed Dawladdu ula wareegtay Beero ku yaal harecrana Guriga Madaxtooyada ee Gobolka Bay dhulkaasoo ahaa dhul beereed kana baxaan khudaar iyo geedo kaloo nacfi leh;

ISAGOO ARKAY: Go'aankii 20.11.78 ee uu saxiixay Guddiga Qiimeynta Beerta Dawladda Gobolka Beydhbo;

ISAGOO TIXGELINAYA: Baahida loo qabo in loola wareego dan guud awgeed Beeraha ku yaal agagaarka Madaxtooyayada ee Gobolka Bay.

WUXUU XEERAYAA

Qodoka 1aad

Waxaa la ogolaaday in la siiyo Magdhaw lacageed dadka laga qaaday Beeraha ku yaal agagaarka Guriga Madaxtooyada ee Gobolka Bay ee loola wareegey dan guud awgeed;

Qodobka 2aad

Dhulka lala wareegay oo ka kooban (Saddex) 3 beerood, waxaa loo celin doonaa dadka lagala wareegay Beerahaas lacag dhan Shs. So. 29.890/= ee la siin doono dadka xaqqa u yeeshay oo ah kuwa hoos ku qoran:

1.	Jaalle Maxamed Cali Saalax Sh. So.	11.700/=
2.	Jaalle Maxamed Xaaji Saalax Sh. So.	14.190/=
3.	Jaalle Axmed Ibbi	4.000/=
	Isugeyn Sh. So.	29.890/=

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 14 Luulyo 1979

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Madaxweynaha J.D.S.

Waan Aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 1 bogga lam. 110
Muqdisho 21 Luulyo 1979
Hantidhowraha Guud KMG

QAYBTA SADDEXAAD

J.D.S.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Faadumo Cali Maxamed maalintii 9.3.1978 loona ogolaaday oo ku yaal Muqdisho Degmada Cabdulcasiis Jidka Bandar Qaasim uu iska beddelay cabbirkii hore Qaabkiisu ahaa Regtangolaare Addimihiisuna ahaayeen 40X20 kuna fadhiyey 800 mdh.

Sababtoo ah qorshaha dhulk oo is beddelay sidaas aawgeed Naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa W.H.G./3/23/ 450 ee 29.6.78 kana baxday Xafiiskaan waxey isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin karo Jaallahaas Qaabkiisu waa Regtangolaare Addimihiisuna waa 40X20 kuna fadhiya 800 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA WAA SIDA HOOS KU TILMAAMAN

Waxaa la caddeynayaa iYtr .eraae cmfwy cmfy cmfw cmf

Waqooyi waxaa ka xiga: Xaajiyo Madiina Wehliye

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Faaduma Sheekh Cosmaan

B a r i waxaa ka xiga: Axmed Muudey

Muqdisho 7 Febaraayo 1979

AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALAYNTA

INJ. CABDIKARIIM CIGE GUULEED

L. 452

J.D.S.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAH. IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Xuseen Cali Maxamed loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho Degmada Hodon Qaabkiisu ahaa Regtangolaare Addimihiisuna ahaayeen 35X30 kuna fadhiyey 1050 mdh. looga qaaday dan guud looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq-shiid Jidka Balcad sidaa awgeed Naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa WHG/3/23/1505 ee 26.12.78 oo ka soo baxday Xafiiska waxey isu beedeshay sida hoos ku ku tilmaaman.

Dhulka loogu bedeelay dhulkii looga qaaday danta guud wuxuu ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq-shiid Jidka Balcad Qaabkiisu waa Regtangolaare Addimihiisuna waa 30X20 kuna fadhiya 600 mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA SOO SOCOTA

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddooyin

Koonfur waxaa ka xiga: Seynab Nuur

Galbeed waxaa ka xiga: Muxudiin Maxamed Xuseen

B a r i waxaa ka xiga: Waddada Balcad

Muqdisho 7 Febaraayo 1979

AGAASIMAHA WAAXDA SAH. IYO DEG. MAGAALAYNTA

INJ. CABDIKARIIM CIGE GUULEED

J.D.S.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
BEDELAAD NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Xaliimo Canab Sheekh Cali maalintii 23.3.77 loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho Degmada Hodon Qaabkiisu ahaa Regtangolaare Addimihiisuna ahaayeen 20X30 kuna fadhiyey 600 mdh. looga qaaday dan guud looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Jidka Balcad sidaa awgeed Naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeeud ahaa WHG/3/23/761 ee 17.9.77 oo ka soo baxday Xafiiska waxey isu bedeshay sia hoos ku tilmaaman:

Dhulkii locgu beddelay dhulkii looga qaaday danta guud wuxuu ku yaal Muqisho Degmada Kaaaan Jidka Balcad Qaabkiisu waa Regtangolaare Addimihiisuna waa 20X30 kuna fadhiya 600 mdh.

SOOHDIMIHIISUNA WAA SIDA HOOS KU TILMAAMAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 404 B
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 401 B
B a r i waxaa ka xiga: Waddo
Muqdisho 7 Febaraayo 1979

AGAASIMAHA WAAXDA SAHAN & DEG. MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIM CIGE GUULEED

L. 454

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
BEDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Maxamuud Ciise Samantar maalintii 16.3.61 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho Degmada Hodon Qaabkiisu ahaa Regtangolaare Addimihiisuna ahaayeen 20X30 kuna fadhiyey 600 mdh. looga qaaday dan guud looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdiho Degmada Kaaraan Jidka Balcad sidaa awgeed Naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa BF 303/560 ee 15.11.67 uu ka baxday Xafiiska waxey isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.

Dhulka loogu beddelay dhulkii looga qaaday danta guud wuxuu ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Jidka Balcad Qaabkiisu waa Regtangolaare Addimihiisuna waa 20X30 kuna fadhiya 600 mdh.

SOOHDIMIHIISUNA WAA SIDA HOOS KU TILMAAMAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 293 B.
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 294 B.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 295 B.
B a r i waxaa ka xiga: Waddo
Muqdisho 7 Febaraayo 1979

J.D.S.

WASAARADDA *H*AWLAHA GUU*D*
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaaji Maxamuud Hilowle iyo Seynab Maxamed Xaaji uu u soo qortay Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaaleynta maalintii taariikhdu 22.1.79 uu ku weydiistay gbal dhul dwladeed ah oo ku yaal Magaaladtan Xamar Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisu waa Regtangolaare Addimihii suna waa 30X20 kuna fadhiya 600 mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi awxaa ka xíga: Cali Muxudiin Wehliye
Koonfur waxaa ka xiga: Cabdullaahi Maxamed Wardheere
Galbeed waxaa ka xiga: Nuur Maxamed Maxamuud
B a r i waxaa ka xiga: Wadddada Balcad

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah.-

Muqdisho 7 Febaraayo 1979
AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIM CIGE GUULEED

L. 460

J.D.S.

WASAAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Xaaji Jaamac uu u soc qortay Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaaleynta Xamar maalintii taariikhdu aheyd 4.7.78 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisu waa Regtangolaare Addimihiisuna waa 20X30 kuna fadhiya 600 mq.

SOOHDIMIHIISUNA WAA SIDA HOOS KU TILMAAMAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 2156 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 2159 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

Qofkii danaynaaya DhulKaas wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah.-

Muqdisho 7 Febaraayo 1979

J.D.S.
WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Khamar Maxamed Xaaji Cabdi uu u soo qortay Waaxda Sah. iyo Deg. Magaaleynta Xamar maalintii taariikhdu aheyd 5.1.78 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisu waa Regtangolaare Addimihiisuna waa 20X30 kuna fadhiya 600 mq.

SOOHDIMIHIISUNA WAA SIDA HOOS KU TILMAAMAN

Waqocyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 895 Y
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 896 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 892 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah.-

Muqdisho 7 Febaraayo 1979
AGAASIMAHA WAAXDA SAHAN. IYO DEG. MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIM CIGE GUULEED

L. 462

J.D.S.
WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADDO DHUL

Wxxaa la caddeynayaa in Jaalle Abiib Xaaji Jaamac uu u soo qortay Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaaleynta Xamar maalintii taariikhdu aheyd 4.7.78 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Yaaq-shiid Qaabkiisu waa Regtngolaare Addimihiisuna waa 20X30 kuna fadhiya 600 mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA SOO SOCOTA

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 2158 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 2161 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 2157 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah.-

Muqdisho 7 Febaraayo 1979
AGAASIMAHA WAAXDA SAH. IYO DEG. MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIN CIGE GUULEED

L. 463

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA

HADDUU AKHRIYEY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: In Buugga Keydka dhumay oo lambarkiisu ahaa 11615 lagana soo saary Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 1aad kuna qornnayd lacag dhan Shs.So. 6,000 uu iska lahaa Saciida Maxamed Xalane sida ku cad warqadda lam. 11615 taariikh 7.6.79 oo bangiga Ganacsig iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 1aad

HADDUU ARKAY: qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9/9/65

WUXUU XEERIYEY

In la baabiyo (ammartamento) (Buugga dhigashada), lam. 11615 oo ku qoran magaca Saciida Maxamed ayna ku jirto Shs. So. 6.000

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta 1aad u beddelo 11615 Saciido Maxamed (buugga Keydka), ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markey ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30 maalmood, maalinta go'aankaan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimiqaraadiga ee Soomaaliya, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin,

Muqdisho 17 7 79

Guddoomiyaha Maxkamadda G. Banaadir
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 466